

Badqabka

Ololeynta

Waddada Saameynta

Hab toos ah oo kor loogu qaadayo
nabadgalyada saxafiyiinta dhanka
ololaynta ee Soomaaliya/Somaliland

Mawaadiicda

Hordhac	5
Xaaladda Soomaaliya/Somaliland	6
Hordhaca Buuggan	9
1.0 Waa maxay u doodid iyo sababta loo sameeyo?	11
2.0 Maxay yihiin sifooyinka wanaagsan ee hwsha ololaha?	13
3.0 Horumarinta istaraatiijiyyada ololaha	17
Tallaabada 1: Qeexida iyo fahmida dhibka	18
Tallaabada 2: Dejinta ujeeddooyinka	20
Tallaabada 3: Fahamka xaaladda siyaasadda	21
Tallaabada 4: Dhiraandhirinta iyo helida daneeyeyaasha	24
Tallaabada 5: Doorashada kooxaha aad dooneyso	26
Tallaabada 6: Horumarinta farriimo muhiim ah	27
Tallaabada 7: Go'aansashada qalabka iyo hawlaha	28
Tallaabada 8: Tixgalinta arrimaha jinsiga ah	29
Tallaabada 9: Sawiridda ama calaamadeyn kormeerka iyo qiimeynta	31
Tallaabada 10: Hubi qataraha iyo sidii lagu yareyn lahaa qataraha	32
4.0 Macluumaadka dheeriga ah	33

**Filik qaade Soomaaliyeed oo
dhufeykiisa ku dhex duubaya
askari ka mid ah ciidanka
Burundi ee ka tirsan ciidanka
Nabad Ilaalinta Midowga
Afrika ee AMISOM.**



Picture © Abukar Albadri/IMS-FOJO



Picture © Abukar Albadri/IMS-FOJO

**Baney Cabdi Xasan, 36,
hooyo 8 carruur ah leh, ku
soo barakacday Baydhabo
Diseember 2016 kaddib markii
ay abaaro ku dhufteen tuuladii
ay degganeyd er Raydab
oo 41km u jirta Baydhabo/
Muhyadin Husni/Ergo**



Picture © Muhyadin Husni/Ergo

Hordhac

Waddama qaar saxafiyiinta waxa ay wajahaan dhibaatooyin, xabsiyo iyo xitaa dhimasho ayaga oo ku guda jira xirfaddooda shaqo. Ilaa xad, tani waxa ay qeexaysaa marxaladda saxaafadda ee Soomaaliya/Somaliland.

Nasiib wanaag, dalka waxaa ka jira ururo bulsho oo awood badan oo difaacaya, ilaalinaya, codna siinaya shaqsiyaadka saxafiyiinta ah iyo warbahintaba marka ay qatar ku jiraan. Ururadaan waxa ay go'aansadeen inay isticmaalaan obole istaraatiijiyad dheeri ah wata si ay u kordhiyaan nabadgalyada iyo badqabka saxafiyiinta.

Hay'ada caalamiga ah ee taageerta saxaafadda (IMS) iyo Machadka warbaahineed ee (FOJO) waxa ay siiyeyen ururada ay wada shaqeeyaan ee ka hawlgala dalka tababaro toos ah ee lagu diyaarinaayo istaraatiijiyada u doodidda. Habkaan waxa uu qeyb ka yahay dhisida awoodaha hawlahan waxaana lagu horumariyey wadatashiga ururada aan wada shaqeyno.

Keliya markii xurriyada saxaafadda la xaqijiyo, warbaahinta ma awoodi doontaa in ay si buuxda doorkooda uga cayaaraan bulsho dimuqraadi ah dhexdeeda, ayaga oo ka shaqeynaya ilaalinta hab shaqeedka maamuliyaasha iyo kuwa awooda heysta iyo in ay u kala warqaadaan bulshada iyo dowladda labaduba.


Buugaan olalaha waxaa maalgaliyey Hay'ada caalamiga ah ee horumarinta Sweden ee loo yaqaano (SIDA), waana qeyb ka mid ah mashruuca: Xoojinta warbaahinta Soomaaliya: kor uqaadida nabada, dib-uheshiisiin, isla xisaabtanka iyo ka qeyb qaadashada muwaadiniinta hab dimoqraadi ah.

Waxaan rajaynayaa in buuggan uu keeno dhiirigelin si loo qorsheeyo loona hirgaliyo Tallaabooyinka kala duwan ee istaraatiijiyada ololaha taas oo keeni karta isbedel guul u ah nabadgalyada saxafiga.



Jesper Højberg

AGAASIMAH GUUD
INTERNATIONAL MEDIA SUPPORT



Johan Romare

AGAASIMAH CAALAMIGA AH
FOJO MEDIA INSTITUTE

Xaaladda Soomaaliya/ Somaliland

Soomaaliya/Somaliland waxa ay leeyihii shuruuc la xiriirta saxaafadda iyo siyaasado taageeraya xurriyadda hadalka. Si kastaba ha ahaatee, in badan oo ka mid ah shuruuccda weli lama hirgalin awoodooda ugu badan si ay u amaangaliyaan xaaladaaha shaqo ee saxafiyiinta, iyo caawinta saxaafadda si ay u buuxiyaan doorkooda horumarineed ee bulshada.

Soomaaliya

Handadaada, xiridda iyo dilalka saxafiyiinta ee Soomaaliya in ay sii socdaan waxa ay noqonaysaa caqabab halis ah. Soomaaliya weli waa wadamada ugu halista badan ee dunida ee qof uu wariye ka noqdo. Shilalka sida weerarrada, xirista idaacadaha ama xiridda wariyeyaasha waa kuwo si joogto ah loo soo tabiyo. Halisaha ugu badan, 53 weriye ayaa lagu diley Soomaaliya tan iyo intii 1992-dii (Xigasho: Committee ton protect Journalists-CPJ).

Xaalada dhibaateynta-nafsiyadeed ee saxafiyiinta loo geysto waa mid ka sii dareysa. Marka loo eego warbixinada Qaramada Midooibey, 30 saxafi ayaa lagu diley Soomaaliya tan iyo intii dowlada cusub ay awoodaa lawareegtey 2012 ilaa 2016. Warbixinta sidoo kale waxa

ay diiwaangalisay 120 tacaddi oo ah xarig sabab la'aan ah iyo xayiraadda shaqaale saxaafadeed intii u dhaxaysay Janaayo 2014 ilaa Luulyo 2016. Intaasi waxaa dheer, ka qaadidda sharafka ama xasaanadda oo aheyd inta ugu badan kiisaska dhacayey. Baaritaanada tacaddiyada dilalka ah iyo xayiraadaha saabab la'aanta ahba ma ahan kuwo si sax ah loo abbaaro, ama inta badan cidna laguma eedeyo.

Waxaa sii badanaya cabsida saxafiyiinta ee la xiriirta in naftooda la dhibaateeyo, cawaaqibka taas ka dhashay ayaa ay in ay isku sameeyaan faafreeb-shaqsii ah oo heerkiisu sarreeyo, waana caqabab aad u adag oo ku hor gudban in saxaaafad xor ah ay doorkeeda si sax ah uga ciyarto bulshada dhexdeeda.

Sharci saxaafadeed cusub oo ay soo saareen xubnaha golaha baarlamaanka Soomaaliya ayaa keenaaya xanibaado hor leh oo kusaabnsan xuriyada hadalka. Sida uu dhigayo sharcigan cusub, warbaahinta waa inay is diiwaangalisaa si ay u hesho ruqsad ay wararka ugu fidin karto si sharci ah. Nuxurka waxaa uu noqonayaa in xarunta warbaahineed ay xurriyaddeeda ay halis u galeyso cabsida ah in lagala noqdo ruqsadda. Isla sharciga sidoo kale waxa uu ogalaanayaa faaf-reeb iyo xaddidaadda

wararka loo arkayo mid dhibaateynaya dowladda iyo dadka. Gudiga saxaafadda qaran waxaa la siiyey awoodo dheeraad ah oo hoos imaanaaya sharciga kaas oo u ogolaanaya in ay soo rogaan cunaqabateyno aad u adag oo ka dhan ah saxafiyiinta iyo warbaahinta, ayada oo ay ku jiraan ganaaxyo culus oo aan caddayn danbigooda. Haddii si kale loo dhigo, sharciga muranka kujira ugu danbeyntii wawa uu kor u qaadey xaddidaadda ay dowlada ku heyso xurriyadda warbaahinta.

Somaliland

Dastuurka Somaliland wawa uu qeexayaa in saxaafadda ay tahay mid xor ah oo madax banaan wawa uuna mamnuucayaa fal kasta oo caburinaya saxaafadda. Sidoo kale Somaliland wawa ay ogalaatey Baqa Caalamiga ee Xaqquqda Bini'aadamka ee Qaramada Midoobey, taas oo sidoo kale taageeraysa ama difaacaysa xurriyadda saxaafadda. Isu soo baxyada, masuuliyiinta dowladda wawa ay amaanaan doorka saxaafadda iyo faa'idooyinka ay u leedahay dowladnimada warbaahin xor ah.

Si kastaba ha ahaatee, marka loo barbardhigo ereyada wanaagsan iyo qaab shariyeedka wanaagsan, dowlada Somaliland weli waa in ay cadaysaa ka go'naanshaheeda inay fuliso habka sharciga.

Xarunta Xaqquqda Aadanaha ee HRC ee fadhigeedu yahay Magaalada

Hargeysa wawa ay diiwaangalisay xarigyo, garaacid, iyo hanjabaadyo loo geystay saxafiyiin, sidoo kale xiritaanka wargaysyo iyo xarumo warbaahineed. Tirooyinkii ugu danbeeyey wawa ay sheegayaan xirida 28 saxafi inta u dhaxaysay Febraayo iyo Nofeember 2016, marka loo barbardhigo 19 wariye ee la xiray isla xiligaas sanadkii tagay. Korarka boqolkiiiba konton (50%) ee xiritaanada sanad gudihiis ah waxaa walaac aad u weyn ku abuuray ururrada bulshada rayidka ee Somaliland.

Handadaada, xiridda iyo dilalka saxafiyiinta ee Soomaaliya in ay sii socdaan wawa ay noqonaysaa caqabad halis ah. Soomaaliya weli waa wadamada ugu halista badan ee dunida ee qof uu wariye ka noqdo.

Ururada bulshada wawa ay hadda ku boorinayaan dowladda Somaliland inay joojiso danbiyeenta saxaafadda iyo shaqsyaadka saxafiyiinta ah. Wawa ay ugu baaqayaan ka laabashada dhammaan eedeymaha ka dhanka ah saxafiyiinta ee taagan; in xanibaadda laga qaado seddax wargays oo xiran; joojinta xiritaanka iyo handadaadda saxafiyiinta; furintaanka ruqsad siinta idaacado madax banaan; iyo diiwaangalinta warbaahinno cusub. Soomaaliya/Somaliland, hagaajinta

amniga iyo badqabka saxafiyiinta waxa ay u baahan tahay in ay isku hawlidleeda qeyb ka noqdaan madaxda go'aanada gaarta.

Marka loo eego xaqiiqda in siyaasadaha iyo sharchiyada jira ay ilaaliyaan saxafiyiinta, dowladahana waxa ay sheegaan inay taageeraan xuriyada hadalka, amniga saxafiyiinta ma ahan mid loo qaadan karo mid la isku halayn karo Soomaaliya ama Somaliland middoodna. Intaas waxaa dheer, helitaanka cadaalad sharciga xaggiisa ah, taas oo ah mid la isku hubi karo marka loo eego qarash la'aanta iyo tayada garsoorayaasha.

maxkamadeynta denbiilayaasha. Intaas kaddib, dowladaha iyo ururada bulshada waxaa ay taageeri karaan doorka muhiimka ah ee ay warbaahintu ka ciyaarto horumarinta bulsho dimoqraadi ah, iyadoo la eegayo danaha dadka Soomaaliya/Somaliland labaduba. Ururada bulshada iyo shaqsyaadka saxafiyiinta ah waa inay weli u dagaalamaan sidii ay u kordhin lahaayeen nabadgalayada saxafiyiinta, ololaha waa habka ugu weyn oo horay loogu waddo howshaan.

Isla xisaabtan dhab ah sida keliya ee lagu gaari karo waa, haddii ay jiraan tallaaboojin rasmi ah oo laga qaado isla xisaabtan la'aanta xadgudubyada loo geysto saxafiyiinta iyo in la xaqijiyo in baaritaano wax ku ool ah iyo maxkamadeynta denbiilayaasha.

Isla xisaabtan dhab ah sida keliya ee lagu gaari karo waa, haddii ay jiraan tallaaboojin rasmi ah oo laga qaado isla xisaabtan la'aanta xadgudubyada loo geysto saxafiyiinta iyo in la xaqijiyo in baaritaano wax ku ool ah iyo

Hordhaca Buuggan

Oloolaha waxa uu qaata waqtii. Dardargalinta isbedelka sharciyada iyo siyaasadaha, haday yihiin dhaqangalinta siyaasado cusub ama fulinta kuwo horey u jirey, waxa ay u baahatahay istaraatijiyyad si wanaagsan isugu dheeli tiran. OLOLayaasha yaryar waxaa ay badanaa raacayaan ujeeddooyinkaaga. Dabcan, xilli aad u ololeynayo sii daynta hal saxafi si sharciga aan waafaqsaneyn ku xiran oo kale, laakiin haddii aad isku dayeyso sameyntha isbeddello waaweyn oo ku saabsan joojinta adeegsiga xariga sharcidarrada ah iyo dilalka saxafiyiinta, waa in aad qaadataa istaraatijiyyad xilligeedu fog yahay.

Buuggan xirmooyinkiisa waxaa uu aqrirstaha siinayaal taloooyinka Tallaabo-Tallaabo ah oo ku saabsan sida loo diyaariyo istaraajiyadda u doodidda. Waxa uu buuggan soo bandhigayaan tallaabooyinka ay tahay in la tixgaliyo, kuwaas oo ah aqoonsiga iyo daraaseynta dhibka iyo qeexidda ujeeddooyinka, dersidda xaaladda ay ku jiraan daneeyayaasha, qeyraadka iyo danaha. Marka diyaargarowga shaqooyinka la dhameeyo, waxaad u dhaqaaqeysaa dhisidda shaxdaada la xiriirta kala xulashada qorshaha diyaarinta

fariimaha, xaqijinta kanaaladii farriimuhu ay mari lahaayeen iyo qalabyada kale, iyo la socodka iyo qiimeyeenta joogtada ah (K&Q). Ugu danbeyntii, waxaan kusoo darnay qeyb jinsiga ah sidoo kalena qataraha gaarka ah, waa in aad tixgalisaa marka aad ka shaqeynayo dhankka kordhintaa nabadgalyada saxafiyiinta dalka. Guud ahaan nidaamka ololaha ee buug yarahani waa mid guud, laakiin waxa uu diiradda saarayaa kordhintaa badqabka saxafiyiinta. Hababka kala duwan ee tallaabooyinka buugga ku qorani waxa ay raacayaan nidaam isku xiran oo isxig-xiga. Sikastaba ha ahaatee, waxaad maskasda ku haysaa in aysan muhiim ahayn in uu ololaha noqdo hab toos ah mar walba, balse waa uu is bedbedlaa, dib ayuu u noqdaa, gees ayuu kula aadaya, isla markiina si dhaqsi ah ayuu horey ugu socon karaa. U doodidtu waxaa ay si dhif ah u raacaa isla waddadii hore laba jeer oo kaliya, waxaana marwalba dhacda hubanti la'aan aan la saadaalin karin.

Buuggan waxa uu ku siinayaal macluumaadka:

- Fikirka guud ee u doodidda, sidoo kalena erey-bixinta ololayaasha;
- Sida loo horumariyo istaraatijiyyad sii loo gaaro hiigsiga ololahaaga
- Sida loo dhiraandhiriyo siyaasadaha

- iyo marxalada siyaasadda ayadoo diirada la saaraayo daneeyeyaasha;
- Sida aad u horumarin laheyd habka aad u wajahayso kooxaha bartirmaameedka kuu ah iyo dhageystiyaasha,
- Ugu danbeyntii sida aad u ogaan laheyd, una heli laheyd xirfadaha muhiimka ah ee loo baahanyahay si aad u noqoto olooleeye guuleysta.

Hagahan waxaa inta ugu weyn loo diyaariyey:

- Ururada ka jira Soomaaliya/ Somaliland ee ka shaqeeya horumarinta xaqquq insaanka iyo nabad galyada saxafiyiinta.

Ma jiro hal hab oo kaligiis soo koobaya mowduuca ololaynta. Si kastaba ha ahaatee, natijada istaraatijiyyada qaaska ah waxa ay ku xiran tahay go'aanada gaarka ah ee ay sameeyeen shaqsiyaadka waxa ayna ku xiran tahay xirfaddooda, aqoontooda iyo kartidooda sidoo kale iyo dhaqaalahooda guulo hore iyo casharo laga bartey. Ugu danbeyntii, sida muhiimka ah, waxa ay ku xiran tahay xaaladda istaraatijiyyadda siyaarinteeda iyo dhaqangelinteeda ay ku dhacayso.

Buuggan waa natijadii ka dhalatay wada shaqeyn dhaw ee ay yeeshen IMS/ Fojo iyo ururada iskaashiga la leh ee Soomaaliya/Somaliland, waxaana lagu saleeyey qibradaha ay ururadaasi u ka heleen arrimaha u doodidda. IMS iyo FOJO waxa ay qabteen tababar

Guud ahaan nidaamka ololaha ee buug yarahani waa mid guud, laakiin waxa uu diiradda saarayaa kordhinta badqabka saxafiyiinta.

bisha Agoosto 2016 si ay macluumaad iyo talooyin ugu uruuriyaan buuggan. Qabyo qoraalkii koowaadna waxaa ka qeybgalayaasha loo soo bandhigay ayna ka doodeen bishii Febraayo 2017.

Waxaan ku rajo weyn nahay in buuggan uu muhiim u noqon doono ururo fara badan iyo shaqsiyaadka ku hawlan u doodidda.

1.0 WAA MAXAY U DOODID IYO SABABTA LOO SAMEEYO?

Qeybaan waxa ay qeexaysaa wawa uu yahay olaha u doodid iyo sababta ay tahay inaad u tixgaliso olalaha marka lagu shaqeynayo buuggan si isbedel loo keeno.

U ooleynta badqabka saxafiga waa:

- Hab foojignaan ah oo lagu saameynayo go'aanada siyaasad dejiyeyaasha marka ay jaan goynayaan ama ay dhaqan gelinayaan si ay u horumariyaan ama u dhaqan gelyaan sharchiyo horey u jirey kuwaas oo saxafiyiinta difaacaya;
- La xaajoodka waajib-sidayaasha iyo siyaasad dejiyeyaasha (Tusaale, dadka, aan aheyn hay'adaha);
- U gundhigidda iyo toos u bilaabidda lala bilaabayo dadka ay quseeyso.

U ooleynta badqabka saxafiga kuma saleysna:

- Waxbaridda kooxo dad ah iyo/ama ururada, kuwaas oo la baro xaaladaha ay ku shaqeeyaan saxafiyiinta;
- In warbixin laga siiyo siyaasad dejiyeyaasha shaqada ururada ka shaqeeyaa u doodidda;
- In kor loo qaado wacyiga bulshada ee shaqada ay qabtaan ururada xaquuqul insaanka ama ururada saxafiyiinta; iyo
- Daneynta hay'adaha (inta la daneyn lahaa dadka).

Oloola u doodidda waxa uu noqon karaa mid toos ah, sida weydiinta siyaad sameeye si shaqsi loo weydiyo in uu qaado tallaabo-hawleed, ama mid aan toos aheyn, sida saameynta aragtida dadweynaha iyadoo la adeegsanayo warbaahinta, sidoo kale, in cadaadis la saaro siyaasad dejiyeyaasha.

Oloola u doodiddu waa hab raac ee ma ahan wax soo saar. U doodid waa hab macnawi ah ee ma ahan hawl dhamaad leh. Natijjada habka raaca waxa ay u dhacaysaa labo qeybood. Sharci cusub ama siyaasado cusub amaba hagaajinta habka fulinta sharchiyo horey u jirey ama siyaasado horey u jiray.

MAXAYNU U SAMEYNAA OOLEYN?

Habka u doodad ama ooleynta waa waa hab wax ku ool ah oo u shaqeeyaa sidii saameyn loogu yeelan lahaa sidaasad dejiyeyaasha iyo waajib-sidayaasha, si bulshada horteeda loogula xisaabtamo.

U ooleyntu waxa ay macne sameynsa marka ay tahay mid keeneysa wax kusaabsan siyaasad iyo isbedel xaga sharciga taas oo riixaysa in la hirgaliyo shuruuc ama siyaasado degsan si loo hagaajiyo badqabka. Marka shuruur la'aan jirto ama shuruucda degsani oo aan lagu dhaqmin ay qeyb ka yihiin dhibaatada, in oole u doodad ah la qaado waa habka ugu wanaagsan in la doorto.

Ololaha waxa uu bulshada u iftiiminayaan faa'iidadu xurriyatul qawlka iyo xoojinta sharchiyo gaar ah iyo siyaasado si loogu helo taageero cadaadis lagu saaro waajib-sidayaasha iyo siyaasad dejiyeyaasha.

qaar. Dhammaan bani'aadamka ayaa ah milkiilayaasha xaqquqda leh, taas oo soo hoos galeysa Baaqa Caalamiga ah ee Xaqquqda Aadanaha.

Fikradaha ay muhiimka tahay in la xasuusnaado marka la diyaarinaya istaraatijiyyad

Masuuliyiinta waxaa saaran waajib ama masuuliyad ay tahay inay xushmeeyaan, in ay xaqiijiyaan xaqquqda aadanaha, isla markaasna ay ka fogaadaan xadgudubuyaada xaqququl insaanka. Arrintu waxaa ay badanaaba quseysaa jilayaasha dowladda, laakiin jilayaasha aan dowliga aheyn ayaa sidoo kale loo tixgalin karaa waajib-sidayaal. Marka laga hadlaayo in aan dembi laga dhigin shaqada saxafiyiinta, Xeer-ilaaliyaha guud ayaa ka mid ah jilayaasha ugu waa weyn. Iyadoo lagu saleynayo hadba xaaladda, shaqsiyaadka (sida waalidiinta), ururada maxalliga ah, shirkadaha qaaska ah, deeq bixiyeyaasha iyo hay'adaha caalamiga ah ayaa sidoo kale waxa ay ka mid noqonayaan waajib-sidayaasha.

Siyaasad-dejiyeyaasha waa xubno ka mid ah dowladda, golayaasha sharci-dejinta, ama hay'adaha kale ee masuul ka ah sameynta xeerar, sharchiyo iwm.

Milkiilayaasha xaqquqdu waa shaksiyaad ama kooxo bulsheed kuwaas oo leh xaqquq si gaar ah ula xiriirta waajib-sidayaasha

Ololeynta iyo wacyigalinta

Ololeyn waxaa qeyb ka ah u doodidda. Marka aad ololeynayo, hadafkaagu waa in aad si toos ah siyaasad dejiyeyaasha uga dhaadhiciso mawqifkaaga. Ujeeddada u ololeynta waa in saameyn lagu yeesho siyaasad-dejiyeyaasha si ay usoo saaraan, u saxaan ama wax uga bedelaan sharci, siyaasad ama barnaamijyo si loo kordhiyo nabaglyada saxafiyiinta.

Marka aan ololeynta u adeegsaneyno hab aan ku qareemeyno, waxaan aqoonsan nahay in sababaha ammaan darrada in ay masuuliyadooda qeyb ku leedahay dowladda. Buuggan, ololeyntu waxaa loo tixgelinayaa in ay fure u tahay, hawlaha habraaca u doodidda.

Wacyigalintu waxaa ay qeyb ga noqon kartaa istaraatijiyyada ololeynta. Waxaad ka wacyigalin kartaa, ama abuurikartaa wacyigalin la xiriirta xaqquqaha, sharciyada ama baahida loo qabo is bedel, taas oo aad gaarsiineyso kooxaha waaweyn ee bulshada, si aad cadaadis u saartid siyaasad dejiyeyaasha.

2.0 MAXAY YIHIIN SIFOYINKA WANAAGSAN EE HAWSHA OLOLAHA?

Aan eegno sifooinka wanaagsan ee hawl olole wanaagsan.

Xirfadaha iyo khibradaha looga baahan yahay olole-u-doodid ee lagu dejinayo istaraatijiyyad iyo habka hirgalineed ee ololaha waxaa ay ku kala duwan yihiin noocyada tallaabooinka, waana mid u baahan in aad adiga eegto naftaada iyo urukaagaba inta aadan billaabini u gogol-xaaridda istaraatijiyyadda u doodidda.

Fiiri naftaada iyo ururkaaga kaddibna isweydi su'aalahaan soo socda:

Sharciyadda

- Ma ku hadli kartaa magaca saxafiyiinta dalkaaga? Ma lagaa tixgeliyaa kooxaha saxafiyiinta dheddooda?

Matalaad

- Saxafiyiintu miyey kuu aqbaleen in aad ku matasho isku dayga ah in aad ajandayaashhood horgeyso siyaasad-dejiyeysaasha ama waajib-sidaasha
- Ma qabtaa fahan qota dheer oo ku saabsan walaaca siyaasadeed saxafiyiinta ay dhibaatadu saameysay iyo doorka u doodid ay rabaan in aad u ciyarto?

Sumacadda

- Xad ineed la eg ayaad galgal

leedahay, ama awoddada dhanka soo bandhigidda cadaynmaha halkeebeey la eg yahay, ma heysataa xog iyo cilmi baaris? Masoo bandhigi kartaa warbixin dhab ah xaqiqadana ku saleysan?

- Xulaafadaadu sidoo kale ma yihiin kuwo lagu kalsoonaan karo?
- Ma leedahay kalsoonni hadda, ama waxaad doonaysaa in aad hadda dhisto, inta aadan ku dhaqaqin hawlaha ololaha?

Awooda dhiraandhirinta iyo istraatiijiyeynta

- Ma leedahay awood ku kala saarto mudnaanta ama ma leedahay dhiiranaan aad ku doorato, kaga noqoto farriimo, qalab iyo kanaalo?
- Ma sawiri kartaa ama ma u kala qeexi kartaa daneeyayaasha sida xulupo, mucaarad ama dhedhaxaad?
- Ma noqon karataa mid dabacsan ahna iqtiraace kana faa'iideysta furasadaha?

Xirfadaha Iskuxirka

- Ma leedahay xirfad isku xir toos ah ama dadban? Ma leedahay ama ma heli kartaa fursad galaangal ee aad kula hadasho dadka saameynta leh?

Xirfadaha xiriirka

- Ma leedahay xirfad sare oo dhanka xiriirka ah, sida

bandhigidda, diyaarinta fariimaha, dhiraandhirinta dhageystayaasha iyo go'aansashada qalabka iyo kanaalada ku habboon?

Dhiraandhirinta loo isticmaalay qiimeynta (XLFQ)

Si aad u dhiraandhiriso xirfaddaada, kartidaada iyo mida ururkaaga xirfadiisa

iyo kartidiisa, waxaad ka faa'iideysan kartaa qiimeynta XLFQ. Dhiraandhirinta XLFQ waa xuruuf lasoo gaabiyeey, kuwaas oo u taagan (Xoogganaanta, Liidashada, Fursadaha, iyo Qataraha).

XLFQ waa curin qaabeynsan iyo hab qorsheyn diirada saaraya afarta cunsur urur ama mashruuc.

XLFQ

Waa aad diyaarin kartaa dhiraandhirinta XLFQ taas oo lagu cabirayo ururkaaga (waxa uu ku Xooggan yahay, qeybaha uu ku Liito, Fursadaha gudihiisa ka jira iyo Qataraha banaanka kaga imaanaya).

Talooyin ku saabsan sida loo sameeyo Qiimeyn wanaagsan (XLFQ)

- U shaqeeya kooxo ahaan, ku dar dadka aadan maalin kasta la shaqeyneynin;
- Tixgali dheeellitirnaanta u dhexeysa ka faa'iideysiga qofka ee hadda iyo ka macaashidda qofka ee mustaqbalka;
- Qaado waqtii kuugu filan oo aad ku gasho dodo aad u qoto-dheer, weydii su'aalo, u shaqeeya si iskaashi leh marka la dhigayo qeexitaanada ugu badan ee dhabta ah kana fogoow qeexitaanada iska furan;
- Bilow dhiraandhirinta qataraha banaanka ah iyo fursadaha
- Xaqiiji sababaha in ay ahaadaan xaqiiqooyin ee aan lagu saleyn fikrado;
- Diirada saar xaaladaha banaanka ah (Ma ahan naftaada ama ururkaaga). Waa waxa isbedelaya, sida ay isu bedelayaan iyo sababta? Tixgali awoodaha gadaal ka riixaya, ay ku jirto bulshada, teknoolojiyada, dhaqaalah, deegaanka, iyo waxyaabaha iyo wadayaasha tiknoolojiyadeed;
- Noqo qof ka run sheega waxaadaan awoodin in aad saadaaliso marka loo eego mustaqbalka.
- Qiimee qatarahii iyo fursadihii hore ee aad seegtay mar hore, tixgali sababta aad u seegtay kuwaas?
- Markaad dhiraandhirinayso mida gudaha ah, ugu horeyntii, tixgali xirfadaha ugu muhiimsan ee loo baahan yahay ee ku gaarsiinaysa yoolkaaga. (Ogow: Xirfadda aqooneed iyo kartida muuqaal waa la iibsan karaa, la kireysan karaa ama waa la is dhaafsan karaa.)

X	L	F	H
XOOGANAAN		LIIDASHO	
gudaha	(halis ah)	gudaha	(caawin)
HALIS		FURSAD	
dibadda	(halis ah)	dibadda	(caawin)

KIISKA: Somaliland

Dulqaad iyo hawl adag ayaa horseeday taabagalka warbaahin xur ah oo madaxbanaan

Tababarka Guurtida

Machadka Cilmibaarista tooska ah iyo tababarada ee loosoo gaabiyo (IPRT), ee Somaliland waxaa uu ogaaday in xubno badan oo ka tirsan golaha Guurtida ay ka shakisan yihiin amaba ay ka madax adeygayaan in ay taageeraan xurriyatul qawlka ama xeerka warbaahinta. Sidaas darteed, **IPRT** waxa ay qaadatay go'aanka ah in tababar loo qabto xubnaha guurtida si loo xoojiyo fahamkooda ku aaddan doorka saxaafada ay ku dhex leedahay bulshada.

Kuwa taageersan iyo kuwa diidanaa intuba ee ka tirsan xubnaha golaha Guurtida waxaa loo arkay in ay saameyn leeyihiin waana la soo xulay si ay tababarka uga soo qeyb galaan.

Inta aan martiqaadka tababarka la dirin ka hor ayaa, xubnaha muhiimka ah ee IPRT ayaa waxa ay kulamo la qaateen hoggaamiyeyaasha ra'yul caamka Guurti, kuwooda taageeriyaasha u ah iyo kuwa xulufada la ah warbaahinta xorta ah.

Inta lagu dhexjirey tababarka, gudoomiye kuxgeenka ururada bulshada ee tixgelinta leh iyo tafatiraha guud ee mid ka mid ah xarumaha warbaahinta ayaa sameeyey duruus jeeding. Tababarka waxaa lagu casuumay 25 xubnood oo ka tirsan Golaha Guurti. Si kastaba ha haatee, waxa uu noqdey mid wanaagsan ay ka soo qeyb galaan 30 ka mid ah xubnaha Guurtida.

Waxaa IPRT u caddaatay in fursadda ugu wanaagsan ee ololaha ay aheyd kulamadii shakhsiga ahay ee ka horreeyey casuummaadda, kuwaas oo dhabaha u xaaray in uu miro dhalo tababarka.

Hab kale oo guusha qeyb ka keenay ayaa ahay in sharciga saxaafadda loo qeybiyey ka qeybgalayaasha, kuwaas oo waxa uu ku wanaagsan yahay iyo caqabadaha ku jira kala dooday tifatirihii caanka ahay. Sida cad, aqoon is weydaarsiga qeybta wadahadalkiisa ugu wanaagsaneyd waxaa ay aheyd doodihii furnaa. Dhamaadkii tababarka, xubnihii aqalka Guurtida dhammaantood waxaa ay taageero u muujiyeen in la dhaqan galiyo sharciga saxaafadda oo aan warbaahinta loo adeegsan xeerka ciqaabta.

Waxaan dareennay in saameyn taas oo qeybta xooqeysatay. Taas waxaa dheeraa, xubnaha golaha Guurtida waxaa ay riyaqayeen habka wartabinta TV-yada.

Madaxa Barnaamijyada, Abdullahi H. Abdullah, IPRT

Labo dersi ayaa laga qaataay khibraddan. Midda koowaad, kulanka heerka sare ah waxa uu faa'iido u lahaa in ay isku arkeen shaqsiyaad saameyn iyo awood leh. Midda labaad, doodaha tababarka waxaa ay heleen saameyn badan taas oo ay keentay ka qeyb gal ka khubaro, iyo xubno Guurti fikrado iska soo horjeeda ka qabay warbaahinta badax banaanideeda, kuwaas oo aan horey u heysan fursad ay ku kulmaan, kuna wada hadlaan.

3.0 HORUMARINTA ISTARAATIIJIYADA OLOLAH

Ka hor inta aan la sameyn kala doorashada tiirkanka ugu waaweyn ee istaraatiijiyada, waa in aan soo bandhignaa wajiyada ugu waaweyn ee habka ololaha uu marayo.

Fikir ahaan, Habka Ololaha waxa uu raacaa wejiyadaan afarta ah ee soo socda:

- 1. Dareen u lahaanshaha dhibaatada iyo waxa sababay.**
In dareenka lagu soo jeediyoo isbeddellada dhanka nabadgalyada saxafiga ah ee iskood u imaanaya iyo kuwa xaga dawladda kaga imaanaya.
- 1. Dareen u lahaanshaha xalka iyo isbedelka siyaasadaha gaarka ah ee loo baahan yahay.** Diirad saaridda isbedelada siyaasadeed ee sharciga saxaafadda dhexdiisa ah, xuriyatul qawlka iwm.
- 1. Hubinta horumarka.** Hubinta hirgalinta siyaasado cusub/ isbedelada siyaasadda.
- 1. Cabbiraadda Saameynta.**
Cabbiraadda saameynta hawlaha ololaha ee badqabka saxafiyyinta.

In aad nidaamka u tixgaliso wejiyo dhawr ah waxaa ay kaa caawinaysaa qorsheynta hawlaha ololaha. Weji kasta dhexdiisa, waxaad ololaha gaarsiinaysaa kooxihiib bartilmaameedka kuu ahaa ee kala duwanaa, waxaadna u isticmaasho farriimo kala duwan iyo kanaalo kala

geddisan. Mawaadiicda u gaarka ah weji walba waxaa ay ku xiran tahay ujeeddada ololaha.

Istaraatiijiyada ololaha waxa ay dabci ahaan qeyb ka noqoneysaa istriraatiijiyadda guud ee ururka. Soomaaliya/Somaliland waxa ay ansixiyeen shariciyo saxaafadeed iyo sharicyo warbaahineed oo adag, laakiin si buuxda looma hirgalin sharciyadaas. Caqabadaha hortaagan hirgalin la'aanta ayaa u baaahan in la ogaado.

TOBAN TALLAABOOYINKA DIYAARINTA QORSHABA OLALAH

Buuggan waxaa lagu qeexay 10 Tallaaboo oo aad u baahan tahay in aad u marto diyaarinta istraatiijiyada ololaha.

Buuggan waxa uu kugu hagayaan

Tallaabooyikan gaarka ah ee soo socda:

1. Qeexidda iyo fahamka dhibaatada
2. Dejinta ujeeddada
3. Fahamka xaaladda
4. Qeexidda iyo dhiraandhirinta daneeyeyaasha
5. Doorashada kooxda bartilmaameedka kuu ah
6. Horumarinta fariimaha muhiimka ah
7. Go'aansashada qalabyada iyo kanaalada
8. Tixgalinta arrimaha jinsiga
9. Qodobida Kormeerka iyo Qiimeynta K&Q
10. Dersida qataraha iyo sidii lagu yareyn lahaa

TALLAABADA 1

QEEXIDA IYO FAHMIDA DHIBKA

Diyaarinta istriraatijiyyadda ololaha kuma timaaddo si filasho la'aan. Ururkaaga waxa uu marka horeba lahaa bartirmaameed la xiriira waajibaadka urur ahaan. Hadda, waxaad u baahan tahay in aad si dhow u eegto dhibaatooyinka la xiriira halka ay diiradda kuu saarneyd, hubi sababaha, qeex xalalka muhiimka ah, ugu danbeyntii, qiimee, haddii olalaha uu yahay habka ugu habboon ee mudan in la isticmaalo.

Waxaad u qeybin kartaa dhiraandhirinta dhibka ilaa sedax tallaabo oo waaweyn adiga oo isticmaalaya tiirkka dhibaatada ay salka ku heysosha.

1. Waa maxay dhibaatooyinka hadda xaalkan taagan

- Qeex xogta iyo warbixinta aad galaangalka u leedahay, isla markaasna diyaari asaas.
- Qiimee sugnaanshana warbixinta iyo qiimaheeda si loo xaqiijiyo xajmiga dhibaatada.
- Qiimee bal in aad heysatid warbixin kugu filan si aad u fahanto dhibaatada iyo waxa sababay
- Qeybo u samee warbixinta

2. Waa maxay sababaha keeney dhibaatada

Si looga jawaabo su'aashan, waxaan soo jeedinaynaa agaasimidda doodad oo lagu saleeyey geedka dhibaatada, taaso ah waddada lagu


xaqiijin karo salka waxa sababay dhibaatooyinka laguna xiri karo salka ugu wanaagsan.

Sawir: Geed leh xidido iyo laamo. Ku qor dhibaatooyinka jiridda geedka. Ka dhig mid kooban. Ha walwalin, haday u egtahay mid baaxad leh iyo isku qasan, sababtoo ah geedka dhibaatada waxa uu kaa caawinayaa in aad qeybo u kala saarto dhibaatada. *Tusaale: 8 saxafi ayaa la handaday, 28 saxafi waa la xiray, 3 warbaahinna albaabada ayaa loo laabay.*

Maskax-shiil: Maxay dhibaatadu u dhacaysa? Ku qor jawaabaha xididada geedka. Markaad isticmaalayso xasuus qor ka samey, waad aad rari kartaa, marka aad isku raacdaan xiriirada u dhaxeeya jawaabaha. *Tusaale: Xeer llaaliyaha Guud ayaa uu culeys siyaasadeed saaran. Booliska ma yaqaanaa sharciyada. Siyaasiyiinta waxa ay si qalad ah u isticmaalaan awooddooda si ay ugu daboolaan fadeexado ay baaritaan ku sameynaysay warbaahinta. Saxafiyiinta ma raacaan xeerka axshaxa saxafadda mana qabaan tababaro xirfaddoda la xiriira.*

Furaha waa waa wada xaa joodka iyo wadahalka la galay, iyo ku daritaanka iyo isku xiridda xididada iyo laamaha.

Xasuusnow; mar walba ma ahan in dhinac ka mid ah khilaafka uu sababo dhibaatooyinka oo dhan.



Dhiraandhirin: Mid kasta oo ka mid ah salka is weydii "sababay?" "Ama maxaa taasi sababay?" q

Haddii aad aragto dhibaatooyin aadan qeexi karin waxa si qaas ah u sababay, go'aanso inaad sameyso cilmi baaris dheeri ah ama raadi caddeymo fara badan.

Waxaa xiga, waxaad u baahan tahay inaad hesho cawaaqibka, kaas oo noqonaya laamaha. Kaddib waxaan habeyn kartaa sababihii ama xididdadii iyo saameyntii ama laamihii adiga oo isugu lamaaninaya sabab iyo saameyn.

3. Waa maxay xalka dhibaatooyinka?

Mid kasta oo ka mid ah asalka sababta, ka dooda, kana baara labo meelood:

- Muxuu noqonayaa xalka farsamo ama hawleed ee dhibatada?
- Maxay tahay siyaasadda ama qorshe siyaasadeedka xalka u ah dhibaatadan?

Haddii aad xaqiqsato in dhibaatada, waxa sababay iyo xalkeeda, ay la xiriirto siyaasado, waxaad u dhaqaaci kartaa Tallaabada heerka labaad ee diyaarinta istaraatiijiyada ololaha.

TALLAABADA 2

DEJINTA UJEEDDOOYINKA

Marka la bilaabayo diyaarinta istaraatijiyyada ololaha, mid ka mid ah tallaaboooyinka ugu horreeya waa in aad go'aansato ujeeddooyinka istaraatijiyyadda.

Marka laga shaqeeynaayo in la kordhiyo nabadgalyada saxafiyiinta, waxaad ku qaldami kartaa in aad aqbasho dhammaan arrimaha kuugu muuqda in ay la xiriiraan badqabka wariyaha, adigoo is leh waxaa ay leeyihiiin muhiimad sare.

Inta aadan qeexin ujeeddada, waxaan si xoogan kuugu dhiirigalinaynaa in aad xisaabta ku darsato arrimahan:

- Diarda saar hal ama dhowr arrimood markiiba, adiga oo tixgalinaya xaaladda iyo awooddaada iyo tan ururkaaga.
- Dib ugu eeg waxaad ku xoogantahay iyo waxaad ku liidato urur ahaan iyo shaqsi ahaan
- Iskaashada ururrada kale ee bulshada ee ka shaqeeyaa arrimaha xiriirka la leh saxaafadda iyo xaquuql insaanka, si ay saameyn ta u weynaato. Tixgali marka aad iskaashi ka sameynayso arrinta iyo marka aad kaligaa qabaneyso.

Noqo qof aragti wanaagsan

Ujeeddada wanaagsan waa in ay yeelataa astaamaha qaar si ay u noqoto mid wax ku ool ah dhab ahaana muhiim ah. Soo gaabinta **CLLMW** ayaa badanaa la isticmaalaa.

Ujeeddada waa in ay noqotaa mid:

C

Cayiman

mid cad, si fican loo qeexay iyo diiradaysan

L

La cabiri karo

Waa in aad awooddaa raadraacidda, diiwaangalinta horumarka iyo guusha

L

La gaari karo

Awooddaada u fidi si macquul ah

M

Macquul ah

Waa in aad awooddaa in aad gaarto ujeeddada, haddii kale qimo ma yeelanayso

W

Waqt Go'an

Waa in aad qorataa waqt macquul ah oo hawshu ay ku eg tahay.

TUSAALE: XARUNTA XAQUUQUL INSAANKA HARGEYSA

Xarunta xaquuqul insaanka waxa ay go'aansatay inay diirada saarto arrimaha saxafiyiinta gaar ahaan kuwa la xiriira hawlahooda caadiga ah balse la danbiyeeyo, waxa ayna ku nuuxnuuksaneysaa «Laga billaabo 30 Juun 2020, Xeer Ilaaliyaha Guud waa in uu xaqijiyyaa in kiisaska ka dhanka ah saxafiyiinta ee Jamhuuriyadda Somaliland in lagu jaangoyn doono sharciga saxaafadda (aan loo adeegsan doonin xeerka ciqaabta), markii ay quseeyaan arrimo la xiriira xirfaddooda.

Tusaalahan waxa uu ka kooban yahay dhammaan qeybihii **CLLMW**, qeybaahas oo ay ka mid yihiin qiimeyn ta u weynaato. Tusaalahan waxa uu ka kooban yahay dhammaan qeybihii **CLLMW**, qeybaahas oo ay ka mid yihiin qiimeyn ta u weynaato.

TALLAABADA 3

FAHAMKA XAALADDA SIYAASADDA

Inta aan la sameeyin go'aanada kuwaas oo lagu hagaayo istaraatijiyada, waxaad u baahan tahay fahan dhameystiran ee xaaladda siyaasadda taasoo aad ku shaqeynayso si ay kuugu sahasho in aad kor u qaado muhiimada istaraatijiyada ololahaaga.

Saaxadda siyaasadda, waxaan ula jeednaa nidaamka siyaasadda, hay'adaha, iyo shaqsiyaadka ku lugta leh. Waxaa ka mid ah xeerar, xayiraado, iyo xaaladaha aad ku hoos shaqeynayso. Sidoo kale waa in aad firisaa tartanka guud iyo isbeddelada waaweyn ee xaaladaha bulsho-dhaqaale ka hor saameyn aad ku yeelan karto saaxadda siyaasadda. Sida darteed, waxaan ku talinaynaa in aad dhaqaale ugu talo gasho dhiraandhirinta xaga **siyaasadda**, dhaqaalah, bulshada iyo xaalada teknooliyada.

Mida koowaad, waa in aad tixgalisaa meesha aad ka heli karto warbixinta ugu danbeeya oo lagu kalsoon yahay si aad ugu isticmaasho dhiraandhirintaada.

Si aad u sameeyo qorshe dejin iyo dhiraandhirin la isku haleyn karo, waxaad u baahnaan doontaa xog la isku haleyn karo. Halka hoose waa liiska meelaha aad ka heli karto warbixin.

- Hay'adaha Qaramada Midoobey, Hay'adaha dowliga ah, Ururada bulshada, Jaamacadaha caalamiga ah iyo kuwa heer qaran, oo ay ku

jiraan akadeemiyiinta.

- Hababka wararka iyo dhiraandhirintooda;
- Raadinta qibradaha ugu danbeeya ee heer caalami, tusaale., sharciyada saxaafadda ee wadamada kale, saxaafadda iyo saxafiyiinta iyo sida ay u wajahaan caqabadaha badqabka saxafiyiinta guud ahaan, iyo;
- Shabakadaha rasmiga iyo kuwa aan rasmiga ahayn oo ay ku jiraan ka qeyb qaashada kulamada iyo wadatashiyada.

Mida labaad, la socoshada xaalada siyaasadda

Si aad ula socoto xaaladaha Siyaasadda, Dhaqaalah, Bulshada iyo Teknoolojiyada, waxaad sameyneysaa maskaxhill iyo dood aad gundhig uga dhigeyso aqoonta aad leedahay, qibradahaaga iyo casharadii la soo bartay. Fursadaha ayaad maskax shiilid ku sameyneysaa iyo qataraha ka imaanaya meel ka mid ah afarta qeyb ee barnaamijaaga, inta aadan tixgalin tallaabta ku habboon ee la qaadi laaha.

Ololeynta, waa in aad taxadar gaar ah siisaa sida ay u shaqeeyaa go'aan sameeyeyaasha, sida ay siyaasadaha isu bed bedelaan, and iyo sida loo joogteeyo. Waaad su'aalahan u adeegsan kartaa hage ahaan.

Saaxadda Siyaasadda:

- Waa kuwee kuwa inta badan ku tartama awoodda? Maxay yihiin aragtiyadooda ku aadan

- siyaasadaha ay sida gaarka ah diiradda u saran tahay?
- Maxay tahay aragtidooda ku aaddan siyaasdaha kale ee saameenaya urukaaga? Maxay siyaasadaha u maqan yihiin ama aan loo dhaqangelinayn si loogu xoojiyo badqabka saxafiyiinta?
- Waa intee qiyaasta waqtiga uu ku imaan karo isbedelka sharciyada lasoo jeediyey?
- Inta ay la eg tahay awoodda ay leeyihiin siyaasiinta muhiimka ah?
- Maxay yihiin hababka tooska ah iyo kuwa aan tooska aheyn ee loo maro siyaasad dejinta?

Xaaladda Siyaasadeed:

- Baaritaan ku samee istaraatijjooyinka lamaanaha la ah siyaasadaha la xiriira nabadgelyada saxafiyiinta. Dowladaha badankood waxa ay dejyaan istaraatijjooyin inta aaney qaadin tallaab sharcii ah ama tallaabo maamul.
- Siyaasiyiinta miyey leeyihiin daneyn ku aaddan doorka ay saxafiyiinta iyo warbaahinta ka ciyaraan ee bulshada dhexdeeda?
- Ma jiraan cunsurro kale oo siyaasadeed oo ay u badan tahay in la bedelo? Calaamey xubnaha iyo hay'adaha dowladda ee doorka ugu muhiimsan ka ciyaraa go'aanada la xiriira siyaasadha, sidoo kale kuwa saameynta ku yeelan kara siyaasad-dejiyeasha.

Xaalada Dhaqaale:

- Sidey xaaladda guud ee dhaqaalaha

saameyn ugu leedahay dareenka go'aan-sameeyaaaha saxaafadda dhexdeeda, warbaahinta?

Su'aalaharrimaha bulshada iyo dhaqanka:

- Maxay aragtiyaha ay ajandahaaga ka qabaan kooxaha kala duwan ee bulshada, tusaale dadka magaalada/kuwa miyigamiiga, dhallinta/dadka waaweyn, aqoonyahanada/dadka aan wax baran?
- Sidee bey xaaladda badqabidda xiriir ula leedahay arrimaha jinsiga?
- Waa kuwee kooxaha sida muuqata u daneeya arrimaha warbaahinta, xuriyadda saxaafadda iyo badqabka saxafiyiinta, miyey ku kala duwan yihiin sida ay u daneeyaan?
- Maxay yihiin waxyaabaha bulshada dhexdeeda mamnuuca ka aha ama aragtiyada saameynta ku reebaya ujeeddooyinkaaga?
- Maxay yihiin sababaha hoosta ka xariiqan ee keenaya in uu qalqal galo ammaanka saxafiyiinta, caddaalad horgeyn la'aanta dembiilayaasha ama dhaqangelin la'aanta sharciyada?

Su'aalahateknoolojiyada?

- Meel maku og tahay teknoolijiyadda ku habboon ee kaa caawin laheyd in aad fuliso ujeeddadaada?

Sideed u qimaynaysaa fursada guusha ee wax ka bedelka bedelaada iyo/ama hirgalinta siyaasadaha? Qiimeytaada waa inay quseysaa xulashada qeybaha

siyaasadda ee aad daneyneso, laakiin ugu horeyntii aan eegno fursadahaaga.

Maxay yihii fursadahaan ama istaraatiijiyooyinkaaad kala dooran karto?

- Waa kuwee xalalka siyaasadeed ee aad ku qeexday tiirka dhibtaatada, taas oo ay suurto gal tahay in saameynta ugu xilliga dheer ay ku leedahay dhibaatada?
- Waa kuwee xalalka siyaasadeed ee sifudud lagu gaari karo iyo kuwa laga yaabo in ay qarasha badan u baahan yihii ama waqtii badan kaaga baahan yihii?
- Waa kuwee xalalka siyaasadeed ee sida fudud loogu heli karo taageero la taaban karo ama, taas bedelkeeda, laga wajiji karo mucaarad culus?
- Maxaa dhacaaya, haddii aan waxba laga sameynin marka loo eego arrimahaan siyaasadda?

Taxliilinta kaddib, Tallaab dib u qaad iskuna day in aad ka hortimaaddo fikirkaaga ee xaaladda siyaasadda iyo fusadaha jira. Wuxaad awoodi doontaa in aan hesho irdo cusub iyo/ama xulufo cusub.

Fursadaha lagu saameynayo siyaasad-sameeyasha waxa ay so bixi karaan waqtii kasta, sidaas darted marka ay jirto ooleyn xooggan, waxaan ku talinaynaa kormeeridda iyo la socodka arrimaha siyaasadda, dhaqaalah, dhaqan-bulsheedka iyo marxalada teknoolijayadeed si loo ilaaliyo fursadaha

ka soo muuqanaya iyo mowfiqyada dowladda iyo hogaaamiyaalka kale ayada oo la tixgelinaayo arrimaha.

Dhiraandhirintaada waxa ay caawinaysaa go'aanka hawlaha kala duwan ee u doodad isku xigxiga. Laakiin ugu horeyntii aan si dhow u firino waa kuwee kuwa doorka ka ciyaaraya.

TALLAABADA 4

DHIRAANDHIRINTA IYO HELIDA DANEELYEAASHA

Go'aansashada arrimaha siyasada kaddib, waxaad u baahanatahay in aad go'aansato waa kuwee shaqsiyaadka iyo kooxaha shaqsiyaadka kuwaas oo leh saameyn toos ah ama mid aan toos aheyn ee arrimaha siyaasadda.

Ogow in daneeyyaasha aysan noqon hay'ado ama ururo, laakiin ay marwalba yihiin dadka.

Guud ahaan, waxaan la shaqeynaynaa afar kooxood:

Bartirmaameeyada: Yeelo awood aad wax ku bedeli karto

Xulufadada: La wadaag ujeedooyinkaaga wawa ayna kaa caawinaysaa in aad saameyso ama culeys saarto kuwa go'aanada-gaara.

Mucaaradka: Wajah waxaad rabto in aad ka miro dhalisid

Dhexdhexaad: noqo mid saameyn leh, laakiin ahaaw dhexdhexaad, u noqo dhexdhexaad dadka xulufada muhiim ah iyo kuwa mucaaradka ahba.

Liiskaan hoose waxaa ku qoran qodobo kugu hagaaya dhiraandhirintaada.

- Aqoonso sawirna ka bixi daneelyeaasha.** Hada, waxaad heysataa guudmar wanaagsan oo ah cida saameynta ku yeelankarta ujeedooyinkaaga, haddii ay taageerayaan am ay ka hor imaanayaan. Qodobkani, waxaa laga yaabaa in aadan xaqijin Karin si sax ah meesha ay ka taaganyihiiin

doodaha/su'aalaha siyaasadda, laakiin u qor liis ahaan si kastaba ha ahaatee.

- Ka hel warbixin daneeyayaasha.** Waa in aad heshaa warbixin taasoo qeexaya heerkooda **saameyn, dhaqaale iyo daneyn** arrimahaan. Sideey markii hore ugu luglahaayeen dooda, tusaale wax ma dheheen ama ma u codeeyeen mowduucyada la xiriira nabadgalayda suxufiyiinta, xuriyatul qawlka, sharciyada saxaafadda. Goormaa ayaa la heli karaa ayaga inta badan, side ayey markii hore saameeyn ugu lahaayeen?
- In aad ayaga u kala qeybiso labo kooxood of taageeriyaal ah, kuwa kasoo horjeeda iyo kuwo dhexdhexaad ka ah.**
- Waa maxay waddooyinka aad umareyso dadka saameyn leh?**
- Waa kuwee kuwa albaabka ilaliya?** Sideed ku dhaafi kartaa kuwa albaabka ilaliya? Ma leedahay shabakad toos ah ama mid aan toos aheyn/xiriiro/warbixino?
- Caddeey ama qeex halka laga bilaabaayo iyo qodobo xiiso leh si loo wajaho daneeyyaasha?**
- Dhisida istaraatiijiyyada xulofooyinka,** tusaale mid wanaagsan, shabakad wax dhisid leh waa in lagu caddeeyo bilowga hal ama labo hadaf oo gaaban-ama dhexdhexaad ah oo cad, micno badan leh oona la gaari karo.
- Adiga ma noqon kartaan kaqeybgale aamin ah xaga taladhiibashada inta lagu gudo jiro wajiga sameyn taaganyihiiin**

XULUFO MISE?

Qibradda waxa ay ku tuseysaa in olalaha dadka badan iyo ururada ku lug leh ay leeyihiin saameyn balaaran iyo qatar yar. Isla jirkiina waxaad soo jiidan kartaan dareen fara badan goobaha siyaasadda. Kaddibna waxaad tixgalinaysaa fursadaha laga helo ama lagu sameeyo xulufo.

Qeexid: Xulufo waa kooxo ururo ah oo isugu xiran si fican ku waas oo hiigsanaya hadafyo isku wada mid ah. Ololaha, hadafka xulufada waa wax la xiriira siyaasadda. Xulufada waxa ay leeyihiin hal ujeeddo marka la gaarana, wadajirka wuu dhamaan karaa ama kooxo ururo ah wey go'aansan karaan inay diirada saaraan ujeeddo kale.

Faa'idooyinka ugu waaweyn ee isku biirida xulufo:

1. Balaarinta awoodda, qibradda, sumcadda, sharciyadda
2. Balaarinta jiritaanka iyo gaaridda
3. Yareynta qataraha ku aadan nabadgalyada tiro ahaan

Taxliilinta su'aalaha muhiimka ah

- Waa kuwee daneeyayaasha kaala qeyb qaadan kara xulufaysiga?
- Ururadee iyo shaqsiyaadkee isla goobta siyaasadda hiigsanaayey?
- Majiraa Isbahaysi ku habboon oo horey u jirey ama waxaad abuuraysaan mid cusub?
- Sidee ururada kala duwan uga qeyb qaadanayaan dadaalada ururada kale?
- Waa maxay faa'idooyinka kulug lahaanshaha isbahaysi?
- Waa maxay faa'ido la'aanta in lagu lugyeesho isbahaysi?

TALLAABADA 5

DOORASHADA KOOXAHA AAD DOONEYSO

Marka la joogo Tallaabadan, ugu horeyntii, hadda caddeey kuwa go'aan-sameeyaasha ah ee leh awood ay ku curiyaan siyaasado cusub iyo/ ama ku hirgaliyaan siyaasado horey u jiray. Shaqsiyaadka Aad hiigsaneyso ama kooxaha waa dadka sameyn kara isbedelka Aad ku dooneyso istaraatijiyyadda ololahaaga.

Waxaan la shaqeynaynaa labo nooc oo kooxaha Aad dooneyno ka mid ah:

- **Kooxda hore** waa shaqsiyaadka leh awoodda tooska ah u leh wax ka bedelka siyaasadda (sida wasiirka warfaafinta, Golaha Guurtida ee Somaliland, Golaha shacabka Soomaaliyeed (Baarlamaanka) iyo Aqalka Sare iwm.
- **Kooxda danbe** waa dadka saameynta ku leh go'aanada kooxdaada hore. Kooxdan waxa ay noqon wadada ugu muhiimsan ee lagula xiriyo kooxaha kore, haddii xitaa si toos ah aan loo gaari karin. Waxaa lagu soo dari karaa ururada buslshada oo si toos ah ugu shaqeynaaya kor u qaadidda badqabka saxafiga, waxaa sidoo kale lagu soo dari karaa kuwo kale oo si qiimo leh u tixgalinaya surriyatul qawlka, tusaae hogaamiyeaasha ganacsatada, ururada maxaliga ama, kiisaska qaar, kooxo qaas ah oo bulshada

ku dhex jira. Fadlan ogoow in hal koox muhiim ah oo ku jirto kooxda labaad ay yihiin siyaasad-sameeyaal/ xubno ka tirsan barlamaanka oo waddo ahaan loo mari karo ama wax ka dhaadhicin kara kuwa go'aan-sameeyaasha ah.

Saameyn ku yeelashada kooxda koowaad arrimaha ku saaabsan siyaasadda waa meesha ugu muhiimsan istaraatijiyyada olole kasta. Inta Aad kagaranayso waxa ay yihiin kooxaha Aad tiigsaneyso, waa inta ugu badan ee Aad u diyaarinayso fariimaha ku habboon, dooro waddooyinka Aad ku gaari karto oo Aad saameyn ugu yeelan karto ayaga.

TALLAABADA 6

HORUMARINTA FARRIIMO MUHIIM AH

Tallaabada ku xigta waa in la horumariyo farriimo muhiim ah. Fariinta waxa ay bedelaysaa marka loo eego cida aad hiigsaneyso, tusaale haddii ay ka mid yihiiin kooxda hore ama kooxda dambe ee aad hiigsaneyso.

Fariinta adag waxa ay ka koobantahay sedax arrimood oo muhiim ah:

1. Wargelin: Ujeeddadaada waa in aad xaqiijiso surriyatul qawlka;
2. Ka dhaadhicin: Doodahaaga waa inay yihiiin kuwo xaqiqda ku salaysan iyo mid si xaqiq ku dhisan loosoo jeediyey.
3. Ku dhaqaaqid ficiil: Noqo mid u cad ficiilada aad jeelaan laheyd dadka aad hiigsaneyso inay sameeyaan

Marka aad diyaarinayso fariimaha, waxaad isticmaali kartaa qaababkaan soo soxda:

1. Qoraal cad oo kusaansan arrinta
2. Sababta ay muhiim u tahay
3. Sideed ku garanaysaa – Cadaymahaaga
4. Tusaale cad
5. Maxaad ka rabtaa qofka aad la hadleysid

Ka dhig mid fudud oo cad. Isku day in aad ka dhigto jumlado yaryar ama ugu badnaan hal jumlad mid kasta oo ka mid ah shanta qodob ee kore.

Fariinta waxa ay leedahay saameyn balaaran marka aad ogtahay cida aad tiigsaneyso. Marka aad

diyaarinayso fariintaada, si foojigan u tixgali natooyinkaaga kasoo baxay dhiraandhirintaada qodobada 4 iyo 5, tusaale Waa maxay aqoontiisa/aqoonteeda, daneynta iyo fahamka maadada? Farinta waxa ay qeexaysaa, si toos ah oo sax ah, waxa aad rabto dadka aad hiigsanayso inay sameeyaan.

Dib uxooji fariimaha: badanaaba, diritaanka fariinta halmar keliya ma ahan wax ku filan. Marwalba yeelo istaraatijiyyad si aad u xoojiso fariintaada, adiga naftaada ama kuwo kale.

Yaa loo gudbiyaa fariinta?

Markaad direyso fariinta, waa in aad xaqiijisaa in aad heysatid dareenka qofka bartirmaameedka kuu ah. Hal waddo oo lagu gaari karo qofka bartirmaameedka kuu ah waa in la xaqiijiyo in fariin sidaha uu yaqaano qofka uu doonayo iyo in uu agtiisa ku leeyahay sumcad sare iyo sharciyad.

Diraha wanaagsan

- Wuxuu awoodaa in uu soo bandhigo aqoon mug leh iyo qibrad sare oo la xiriirta arinta su'aal ahaan
- Matahay isha fikrada mid uu qimaynaayo qofka la hiigsanaayo.

TALLAABADA 7

GO'AANSASHADA QALABKA IYO HAWLAHA

Tallaabada xigta waa doorashada sida loogu diro fariimaha dadka la hiigsanaayo. Waa xiliga la tixgalinaayo waddadee ugu fiican lehna smaaeyn weyn si loo helo natijada ugu wanaagsan.

Waa maxay farsamooyinka, kanaalada iyo qalabyada inta badan lagu gaari karo hiigsiga?

Guud ahaan, waa inaad kala saartaa inta u dhaxeysa:

- Hal waddo ama labo waddo
- Toos ah ama aan toos aheyn
- Kulamo xiran ama kulamo guud
- Laba qof wax u dhaxeeya ama warbaahinta

Waa inaad tixgalisaa:

- Waddoooyinkee dadka aad barto ay u arkayaan mid lagu kalsoonaan karo oo la isticmaali karo?
- Ma u baahantahay jawaab celin deg deg ah?
- Ma lawadaagtaa warbixin si kor loogu qaado fahamka iyo/ama cadaadis/dalabaadka ee ku aadan go'aan-sameeyayaasha?
- Sideed ukula dooranaysaa waddooyn kala duwan oo midba midka kale kuxiran?

Dejinta waqtiga

Waa inaad dejisaa waqtiga shaqooyinka aadna tixgalisaa sida hawlaho kala

duwan ay isu taageeyrayaan. Ololaha, horumarka waxa uu noqon karaa mid aan la saadaalinkarin fursado cusubna wey soo muuqan karaan, texgali in marxalad kasta ay noqoto mid la jaanqaadaya qorshahaaga una ogolaanaysa waqtii fara badan. Tusaale, waxaad gaartey ujeeddadaada xilijii aad fileysay ka hor, waxaad ku raaxeysan kartaa guul balaaran.

Tixgali miisaaniyada

Ku dar miisaaniyadaada qeyb qarashaadka aan hore loo qorsheyn ama in lagu daboolo fikrado cusub taaso aan lasaadaalin karin bilowga hore ee qorshaha ololaha. Haddii kale, kudar mushaaraadka, shaqooyinka iyo dhacdooyinka, wax soo saarka iyo qeybinta alaabta, shaqooyinka la talinta banaanka ah, qarashaadka dheeriga ah iwm

TALLAABADA 8

TIXGALINTA ARRIMAHAA JINSIGA AH

Markaad diyaarinayso istaraatijiyad u doodid iyo shaqooyinka gaarka ah ee nabadgalyada saxafiyiinta, ururada waa inay tixgaliyaan xaalado gaar ah udoodida in la kordhiyo nabadgalyada haweenka. Dhammaan hawlaha olalaha, fikirada waa in lagu daraa dhiraandhirin-mug leh iyo caddeymo isdabayaalo ee xaaladaha gaarka ah taasoo haweenka wajahaan oo la xiriirta nabadgalyada.

Marka diirada la saaraayo nabadgalyada la xiriirta jinsiga ee warbaahinta dhexdeeda ah, fikradaha ololaha waa inay si hoose u eegaan gudaha ururada warbaahinta sidoo kale u doodidda bdedelka siyaasadda iyo/ ama hirgalinta siyaasadda. Hadaba, in lasii joogteeyo sumcada iyo sharciyad adag, ururada waa inay hoos u eegaan ayagoo xaqijinaaya in ururka naftiisa sidoo kale shaqsiyaadka xabaarsan dhaqanka wanaagsan marka loo eego saaxiibada haweenka horumarinta ka mid ahaanshaha haweenka iyo nabadgalyadooda.

Shan meelood meel keliya oo ka mid ah saxafiyiinta dalka aaya haween ah. Liidid xaga dhaqanka iyo bulshada ah aaya ka hor istaaga haweenka inay door hogaamineed ku yeeshaan warbaahinta. Taas waxaa u dheer, haweenka ka shaqeeya warbaahinada waaweyn waxa ay doorbidaan in ay ka fogaadaan sameynta barnaamijiyada sida kuwa

dabagalka arrimaha muhiimka ah ee ay qatar kaga imaan karto.

Tixgali:

- Siyaasadahaaga gaarka ah iyo hab dhaqanka ku wajahan ka qeyb galinta haweenka iyo badqabka haweenka kula shaqeeya.
- In aad xaqiijiso mataalaada haweenka isla hawlaha ololaha?
- Haweenku miyey u baahayihiin in si gaar ah diiradda loogu saaro istaraatijiyada ololaha ee isbeedelka siyaasadda iyo hirgalintiisa?

KIISKA: SOOMAALIYA

Wax ka bedelka hab dhaqanada waxa ay u baahan yihiin istaraatijiyyad fog iyo waqtii, waxa ay ahmiyad muhiim ah u noqonaysaa ujeedooyinka xilli dhow iyo sida hal Tallaab loogu qaadi karo dhanka guusha.

Haddii aan eegno Soomaaliya, haweenka saxafiyiinta Soomaaliyeed si sax ah loogama qeyb galiyo heerarka maamulka ee warbaahinta. Haddii la eego mid ka mid ah sababaha keenaya in aan heerarka maamulka laga wada qeyb galin waxaa soo baxeysa in heerka aqoonta ee gabdhaha saxafiyiinta ah uu ka hooseeyo heerka aqoonta ee qiilasha, sidaas waxaa qaba baaritaan uu sameeye **Urur Haweenka Saxafiyiinta Soomaaliyeed ee loo soo gaabiyo SWJ**. Sidoo kalena haweenka saxafiyiinta ah waxa ay culeys kala kulmaan helitaanka fursado dheeri ah oo xaga tabaradda iyo waxbarshada marka ay xarun warbaahin u shaqo bilaabaan. Waxaa intaas dheer haween badan in ay dhibaato ka qabsato in ay helaan taageero waxbarasho sababo la xiriira dhaqanka bulsahada.

Ururka saxafiyiinta haweenka soomaaliyeed ayaa go'aansadey inuu diyaariyo olole u qareemid ah oo ku wajahan maamulka hay'aadaha iyo xarumaha warbaahinta iyo jaamacadaha, sidoo kale maamulada hoose ee dowladda. Ujeeddada ololahaasna waa in haweenka saxafiyiinta ah loo ogolaado ay shaqeeyaan iyo gelin ay aadaan waxbarasho.

TALLAABADA 9

SAWIRIDDA AMA CALAAMADEYNTA KORMEERKA IYO QIIMEYNTA

Kormeer iyo qiimeyn (K&Q) waxa ay muhiim u yihiin ilaalinta hereglinta istaraatijiyyada ololaha jideysan. K&Q sidoo kale waa qalab maareyn qimo badan si loogu sameeyo isbedelada go'aanada qorshaha. Oloalaha K&Q badanaa waxa uu diirada saaraa habka socodka marka loo eego natijjada.

Sahmin

Waxa uu u bahanyahay k&Q dareen horaanta marka lagu jiro qorsheynta waana in lagu jaan gooyaa sahmin mar dhow ah. Qiimeynta sahminta wixa ay keenaysaa warbixin kusaabsan xaalada ololaha ay doonayso isbedel iyo meesha tixraaca oo lagu qiimeynaayo saameynta, ayadoo abuureysa heerka isku bardardhigida xaaladii hore sidey ahayd iyo hawlgalka kaddib sidey noqtey.

Sahminta waa inay ku jiraan warbixin xaalada istaraatijiyyada ololaha ay raadinayso inay bedesho. Ilaha warbixinada quseeya sahminta waa inay ku jiraan: tirokoob dhab ah, natijjooyinka sahamo hore iyo tayada warbxinada cilmibaariseed, joornaal iyo qoraalada wargeesyada.

Aan qorno qeexitaano rasmi ah

- **Kormeerka:** Waa hab nidaamsan oo lagu aruurinaayo xog wax-soo-saar, hawlihiil la qabtay iyo natijjada ka dhalatay.

- **Wax soosaarka:** Waa isbedelka lagu sameeyey xaga aqoonta, fikirka ama aragtiyooyinka ee la xiriira dhanka siyaasadda.
- **Hawlaha:** Waa hawlaha gaarka ah ee la qabtay inta lagu guda jiray hirgalinta istaraatijiyyada. Hawlaha waa in la kormeeraa. Waa in aad kormeertaa hawlahaaga si aad u caddeyso guulaha iyo caqabadaha, iyo sidoo kale, casharadii laga bartey.

Kormeerridda horumarka iyo horumar la'aanta waxa ay fursad kuu siineysaa in laga tashado xaaladaha nabadgalyo iyo badqab ee saxafiyiinta.

Qiimeen

Qiimeynta istaraatijiyyada ololaha waxa ay diirada saaraysaa labadaan meelood ee soo socda:

1. **Saameynta.** Qiimeynta lagu sameynayo saameynta waxaa lagu hubinayaa in ujeeddooyinkaaga siyaasadeed in la gaarey, si la xiriirta isbeddelada siyaasadda ama kordhintaa hirgalinta siyaasadda; iyo
2. **Saameyn.** Qiimeynta waxa ay hubisaa saameynta isbedelladan ee ku aadan nabadgalyada saxafiyiinta.

Su'aalah la isweydiyo marka la joogo qiimeynta istaraatijiyyada:

- Ma dooratey ama ma gaartey mid ku habboon kooxaha koowaad iyo kooxaha labaad?
- Ma bedeleen fariimaha ololaha dadka aad tiiganeysay ra'yigooda ama aqoontooda ku aadan

- nabadgalyada saxafiyiinta?
- Siyaasado cusub mala soo saarey iyo/ama kuwii jirey mala hirgalleyey?
- Saxafiyiin yar keliya maa lakulmey dhibaatooyin, xiritaano iwm ka hor inta aan la dejinin istaraatijiyyada?
- Hawlaha ololaha kor ma u qaadey wacyigelinta iyo rabitaanka nabadgelyada saxafiyiinta?
- Waa maxay caqbadaha ugu waaweyn ay wajahaan istaraatijiyyooyinkaaga iyo hawlahaaga hgaarka ah?
- Waa maxay casharadii laga bartey sameynta istaraatijiyyada iyo hirgalinteeda fikirada mustaqbalka?

TALLAABOOYINKA10

HUBI QATARAHAA IYO SIDII LAGU YAREYN LAHAA QATARAHAA

Inta badan ee aad fahantahay marxalada siyaasadda ee aad ku shaqeynayso, waa sida wanaagsan ee aad u hubin karto dabeecadaha iyo yareynta ama hoos u dhigida qataraha shaqsyaadka saxafiyiinta ah iyo adiga oo udoode urur ahaan.

Marka la diyaarinaayo istaraatijiyyada ololaha ee goobaha mowduucyada mar hore qataro laga filaayey, waa laga maarmaan in aad si taxadir leh u tixgalinayso qataraha jira ee kaa horeeya.

- Ugu horeyntii, hubi in go'aanadaada ay ku saleysanyihii warbixino iyo wacyiga xaalada markaas la joogo.
- Mida labaad, sifican u qorsheey hawlahaaga kormeerna kusameey aragtiyooyinka adage ee dhanka hawlahaaga ah, ururka iyo shaqsyaadka.
- Mida seexaad, yeelo qorshe sida looga falceliyo haddii uu dhib dhaco, heerka mida siyaasadda iyo heerka hawlqabad

4.0 MACLUUMAADKA DHEERIGA AH

ARAGTI AHAAN:

http://orsimpact.com/wp-content/uploads/2013/11/Center_Pathways_FINAL.pdf

KORMEERKA IYO QIIMEYNTA (K&Q)

<https://www.odisites.org/sites/odi.org.uk/files/odi-assets/publications-opinion-files/6453.pdf>

XASUUS QOR



EAN 9788792209832

ims

INTERNATIONAL
MEDIA SUPPORT

IMS was urur caalamil ah oo ka shaqeeya horumarinta warbaahinta caalamka, wuxuuna unrade warbaahinta gudaha kala shaqeeeyaa sidi ay u suunto galin lahaayeen hanaan lagu yareeyo colladaadha, lagu dhiri galivo dimoqradiyadda, laguna abuuro jawi wadahadal.

FOJO: MEDIA INSTITUTE
■ ■ Linnæus University

"Machadka Warbaahinta **FOJO** waxaa uu taageeraa warbaahinta xurta ah, madaxbaanaan ee xirfadleyda ah ee dunida, taas oo uu ku taageero mashaaric horumarineed heer hoose, heer qaarad iyo heer qaran".



EMBASSY OF SWEDEN

Nairobi

Daabacaadha buuggan waxaa lagu suarto galiley taageerada dowlaadda Sweden.

Buuug yarahen waxaa lagu diyaarliyey la tashiyoo lala sameeyey iyo maclumiimad ay unrinitisa ka qeyb qateen ururada iskaashiga la leh IMS-FOJO, kuwaas oo kala ah Ururka Warbaahinta Soomaali ee SOMA, ururka Haweenka Säkäfylinta Soomaaliyeed ee SWJ, Ururka Warbaahinta Madaxbaanaan ee Soomaaliyeed ee SMHA, Ururka Warfidiyeenka Puntland ee MAP, Ururka Säkäfylinta Somaliland ee SOLJA, Xarunta Xaqqugul Insaanka ee HRC iyo Machadka Ciimibaarista iyo Tababarada ee IPRT.